



TILMAAMAH LA SIIYO BUKAANKA DAWEYNTA WADNAHA IYO XIDIDDADA WADNAHA KLIINIKADA MANKATO BAARISTA HOLTER MONITOR EE 7DA MAALIN

7 Day Holter Monitor Test - Somali

Bukaanka: _____ Taariikhda Ballanka: _____

Waqtiga Imaashada: _____ am/pm

Goobta: Waaxda Daweynta Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha ee Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

Maxay tahay sababta aan u qaato qalabka Holter Monitor?

Baaristaan waxay qortaa jaantuska Electrocardiogram (ECG ama EKG) ee bukaanka muddo 7 saac, maalin bukaanka ku sugan yahay hawl maalmeedka caadiga. Waxaa loo isticmaalaa in lagu ogaproject cilladaha garaaca, waxyeelada daweynta, iwm.

Baarista Ka Hor

- Qiyaas ahaan, hawshaan waxay qaadataa 30 daqiiqo.
- Maqaarkaada ha marin subag, waxyaabaha jilciya maqaarka ama saliidda cunugga maalinta ballanka.
- Dumarka:** Fadlan ha soo qaadanin naas celinta dhaadheer, cambuurada ka kooban hal cambuur, cambuurada dhaadheer ama suun.
- Fadlan ogeysii shaqaalaha kliinikada haddii aad qabtid xasaasiyad.

Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad iska dhigti dharka laga bilaabo dhexda ilaa kor.
- Waxaa la diyaarin doonaa maqaarka, waxaan lagu ruggi doonaa marro qalalan. Ragga waxaa loogu xiiri doonaa sida habboon.
- Waxaa xabbadka lagaa saari doonaa shan qaadeyaasha korantada ee halka mar la isticmaalo.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad qortid hawlaha aad qabtid maalintii inta aad haysatid qalabka (monitor). Marka aad buuxineysid qoraalka, isticmaal saacadda ka muuqata dhanka hore qalabka (monitor).
- Waxaa lagu fari doonaa in aadan qoynin qalabka (monitor).
- Iska saar qalabka (monitor) inta aad ku qabeysaneyesid turbada amad saxanka.
- Waxaad awood u heli doontaa in aad ka saartid qalabka (monitor) muddada 7da maalin baarista kaddib haddii aad raali ku tahay in aad sidaas sameysid. Haddii kale, waxaad ku soo celin kartaa waaxda Daweynta Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha si looga saaro.
- Haddii aad qabtid su'aalo inta aad haysatid qalabka (monitor), fadlan wac Shaybaarka Shiddada Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha (Cardiovascular Stress Lab), telefoonka 507-389-8618.

Baarista Kaddib:

- Waxaad qalabka Holter Monitor ku soo celisaa waaxda Cardiovascular Medicine.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeysa waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbaday baaritaankaada muddo shan maalin oo la shaqeeyo gudahooda.
- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

Haddii aan aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natijjada.

Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8519.

Fadlan iska xadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Daweynta Wadnaha iyo Xididdada Wadnaha.